



Sida loo helo lacagaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound)

Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) waa barnaamij kaalmo maaliyadeed oo ay gobalku bixiso kaas oo ka caawiya ardayda u qalma inay iska bixiyaan kharashka waxbarashada ka dib dugsiga sare. Waxeey caawinaad ka geysataa bixinta kharashka dhexdhexaadka ah ee waxbarashada (kharashyada dugsiyada dadweynaha), qaar ka mid ah khidmadaha, iyo lacag yar oo loogu talagalay buugaagta. Waa muhiim in la fahmo sida barnaamijku u shaqeeyo iyo talaabooyinka aad u baahan tahay inaad qaaddo si aad u hesho lacagaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound).

Talaabooyinka lagu heli karo lacagaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound):



Waxa aad u baahan tahay inaad samayso:

- Buuxi [shuruudaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka \(College Bound\)](#).
- » [Dhameystir FAFSA \(Free Application for Federal Student Aid, Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardeyga ee Federaalka\) ama WASFA \(Washington Application for State Financial Aid, Codsiga Kaalmada Maaliyadeed ee Gobolka Washington\)](#) sanadkaaga ugu dambeeya ee dugsiga sare iyo sannad kasta oo aad dhigato kulleejka ama dugsiga farsamada. Ku qor dhammaan kulleejyada aad qorsheyneyso inaad dhigato codsigaaga kaalmada maaliyadeed. Ugu yaraan saddex kulleej ayaa lagu talinayaa.
- Iska-diiwaangeli kulleej ama dugsiga xirfadeed gudaha hal sano kadib markaad ka qalinjebiso dugsiga sare.
- Dhigo mid ka mid ah in ka badan [60 dugsiga oo u qalma ee ku yaal Washington](#).

Fiiro gaar ah: Dugsiga kastaa wuxuu leeyahay waqtiyada kama dambaysta ah ee kaalmada dhaqaale oo ay tahay inaad raacdo.

Maxaa xigaa?

Shaqaalaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) ayaa:



- Isku beegi doonaan codsigaaga kaalmada maaliyadeed iyo codsigaaga barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound).
- U sheeg kulleejyada WA ee aad ku qortay FAFSA ama WASFA inaad tahay arday kujira barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound).

Kulleejkaagu waxa uu:

- Isticmaali doonaa kaaga ah FAFSA ama WASFA si uu u hubiyo u-qalmitaanka dakhligaaga sannad kasta si loo xaqiijiyo inaad u qalanto.
- Isku geyn doonaa dhammaan kaalmooyinka maaliyadeed ee aad heli karto, oo ay ku jiraan lacagaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) iyo [Deeqda Kulleejka ee Washington \(Washington College Grant\)](#), haddii aad u qalanto.
- Kuu soo diri doonaa dalab abaal-marin kaalmo maaliyadeed oo muujinaya inta kaalmo maaliyadeed ee aad heli doonto.

Fiiro gaar ah: Si aad u heshid caawimo ku saabsan abaal-marinahaaga kaalmada dhaqaale, u-qalmitaankaaga, ama habraaca, la xiriir xafiiska kaalmada maaliyadeed ee kulleejkaada.

Immisa ayaad heli doontaa? Qadar lacageedka aad heli doonto waxay ku xiran tahay:

- Dakhliga qoyskaaga (oo ka socda kaaga ah FAFSA ama WASFA).
- Nooca kulleej ama dugsiga farsamo ee aad dhigato.
- Haddii aad dhigato wakhti buuxa ama wakhti nis ah.

Fiiro gaar ah: Haddii aad hesho kaalmo kale oo gobolka ka imaata sida Washington College Grant (WA Grant), qadarkaaga lacagta barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) ayaa laga yaabaa inuu yaraato, ama laga yaabo inaad helin gabi ahaanba. Laakiin ha welwelin, weli waxaad heli doontaa kaalmooyinka gobolka ee aad u qalanto. Kaalmooyinka kale ee maaliyadeed (sida Deeqaha Pell (Pell Grants), deeqaha shaqee-oo-wax-baro, iyo lacag amaahinada) waxay kaa caawin karaan iska-bixinta kharashyada dheeraadka ah. Habka keliya ee lagu ogaan karo waxa aad u qalanto waa inaad codsato kaalmo maaliyadeed.

Su'aalo miyaad qabtaa?

Si aad u hubiso haddii aad ka diiwaangashan tahay wax ah barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound):

limayl u dir: collegebound@wsac.wa.gov.

Wac taleefanka: 888-535-0747, doorashada 1-aad.



Wax badan ka oggaw oo ku saabsan barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) barta collegebound.wa.gov.

Wax badan ka oggaw oo ku saabsan qorsheynta mustaqbalkaaga barta wsac.wa.gov/actionplan.

